



Ugu dambeyntii la cusbooneysiiyay:
Sibtembar 1, 2020

Hagida Dib u Furidda ee Marxalada Labaad – Hay'adaha Madadaalada Banaanka

Amarka: Lambarka Amarka Fulinta 20-27, ORS 433.441, ORS 433.443, ORS 431A.010

Khusaynta: Hagidan waxay khusaysaa hay'adaha madadaalada banaanka ee degmooyinka ku jira Marxalada Labaad.

Hirgelinta: Ilaa xadka uu hagistan u baahan yahay u hoggaansanaanta qodobbada qaarkood, waa wax la fulin karo sida lagu qeexay Amarka Fulinta 20-27, qaybta 26.

Hay'adaha madadaalada banaanka waxaa looga baahanyahay inay:

- Dib u eegaan ayna hirgeliyaan [Hagida Guud ee loogu talagalay Badrooniyaada](#).
- Kahor dib u furida xiritaanka mudada dheer ah kadib, xaqiijiyaan in dhammaan jardiinooyinka iyo xarumaha ay diyaar u yihiin inay shaqeeyaan iyo in dhammaan qalabyada ay wanaagsan yihiin, sida ku xusan buugaagta dayactirka iyo hawlgallada ee khuseeya iyo hab-raacyada caadiga ah ee hawlgalka.
- Ka mamnuucaan kooxaha (koox ah 10 qof ama ka yar oo goobta wada yimid) inay isugu yimaadaan meelaha baabuurta la dhigto waqti ka badan inta caqliyan suurtoogalka ah inay ku qaadato baakimida baabuurka/kicinta baabuurka iyo galida/ka bixida baabuurka.
- Calaamado iyo waxbarasho ku xoojiyaan muhiimada ay leedahay joogteynta masaafo ah ugu yaraan lix (6) fuud oo dhaxaysa kooxaha (koox ah 10 qof ama ka yar oo goobta wada yimid) ku socda tuwaalaha, jooga xeebaha iyo kuwa saaran jaraanjarada doonmaha.
- Dhiirrigaliyaan masaafo ah ugu yaraan lix (6) fuud oo u dhexeeya dadka ka kala socda qoysas kala duwan ee jooga garoomada ciyaarta ee dibadda ah, oo ay ku jiraan goobaha biyo ku ciyaarka.
- Dhiirrigeliyaan gacmo-dhaqashada markii la joogo gudaha iyo agagaarka garoon ciyaareed ee dibadda ah, oo ay ku jiraan goobaha biyo ku ciyaarka. Gacmo-nadiifiyaha wuxuu ku habboon yahay gacmo nadiif ah. Ururada madadaalada dibadda ayaa waxay gacmo nadiifiye (60-95% ka kooban aalkolo) ay siin karaan dadka isticmaalo garoomada dibadda ah.
- Xir sanduuqyada ciidda maadaama aan la oggolayn waqtigan.

- Si buuxda u nadiifiyaan musqulaha ugu yaraan laba jeer maalintii iyo, inay intii suurtagal ah, xaqiijiyaan in la heli karo agabyada nadaafaddu oo ku fillan (saabuunta, tiishka musqusha, gacmo-nadiifiye 60-95% ka kooban aalkolo) maalinta oo dhan. Musqulaha aan la nadiifin karin laba jeer maalin kasta waa in la xiraa ama waa in lagu dhejiyaa calaamad sheegaysa in musqusha aan la nadiifin karin laba jeer maalin kasta.
- Si joogto ah u nadiifiyaan ugana dilaan jeermiska aagagga shaqada, aagagga dadka ku badan yihiin, iyo sagxadaha badanaa la taabto ee goobaha dadweynaha iyo goobaha gaarka ah ee jardiinooyinka iyo xarumaha.
- Dhejiyaan [calaamado cad](#) oo:
 - Taxayo astaamaha COVID-19,
 - Weydiisanayo shaqaalaha, tabaruceyaasha iyo booqdeyaasha qaba astaamaha inay joogaan guriga **oona**
 - Taxayo cida lala soo xiriirayo haddii ay u baahdaan caawimaad.
- Qaabeeyaan goobaha caanka ah sida miisaska lagu cunteeyo ee aan yaalin gudaha hoyga/dhismayaasha, hoyga maalintii la isticmaalo, iyo dhismayaasha u furan dadweynaha si markaa ya masafo ah ugu yaraan lix (6) fuud ugu dhaxeeysa kooxaha (kuraasta, kuraasta dhaadheer, miisaska).
- Dhejiyaan [calaamado cad](#) si ay u xoojiyaan shuruudaha kala fogaanshaha jireed ee u dhexeysa booqdayaasha ka tirsan kooxo kala duwan.
- Raacaan [hagida Marxalada 2-aad ee Ciyaaraha Madadaalada ah](#), haddii ay khuseeyso.
- Dib u eegaan oo ay hirgeliyaan [Hagida Maaskaraha iyo Daboolada Wajiga ee loogu talagalay Ganacsiga, Gaadiidka iyo Dadweynaha](#).

Illaa iyo intii suurtagal ah, wakaaladaha madadaalada dibedda waa inay, laakiin loogama baahna:

- Tixgeliyaan xiritaanka goobaha beerta ee isku dhedhegan si loo fududeeyo in kooxaha jir ahaan kala fogaadaan ugu yaraan lix (6) fuud.
- Tixgeliyaan u furida tuwaalaha hal dariiq si loo yareeyo istaabashada dadka lugeeynaya. Ka dhig dariiqyada socodka ee halka dhinac ah kuwa soo jiidasho leh haddii ay macquul tahay.
- Ku dhiirrigaliyaan dadweynaha inay booqdaan jardiinooyinka iyo goobaha madadaalada inta lagu jiro waqtiyada ay dadku ku yar yihiin sida ay qeexeen ayna daabaceen maamulka jardiinooyinka ama aagagga madaddaalada.
- Ku dhiirrigaliyaan dadweynaha inay booqdaan jardiinooyinka iyo goobaha madadaalada ee u dhaw gurigooda, ka fogaadaan safarada habeenka ayna yareeyaan u safarka meel ka baxsan aagooda madaddaalada ee u dhow. Gaar ahaan uga diga dadweynaha in aysan u safrin meel ka baxsan gurigooda haddii ay ku nool yihiin aagg ay joogaan dad tiro badan oo qaba COVID-19 si looga hortago in shaqsiyaadka qaba COVID-19 balse aan muujinayn astaamo ay iyagoon u qasdin geeyaan fayruuska aag uu cudrka aad ugu yar yahay.
- Tixgeliyaan furida garoomada gaarka loo leeyahay, kuwa degmada, kuwa gobolka iyo federaalka keliya haddii kala fogaanshaha jireed ee dadka la jogteyn karo. Jardiinooyinka Gobolka Oregon ayaa laga yaabaa inay go'aan gooni ah ka gaaraan

furida xerooyinka gobolka iyagoo ku salaynayo diyaar ahaanshaha, awooda lagu joogteyn karo shuruudaha kala fogaanshaha jireed iyo iyagoo kala tashanayo Gubanatooraha.

- Tixgeliyaan furida jardiimada gaariga barafka keliya haddii sharuudaha kala fogaanshaha jireed la joogteyn karo.
- Ku dhiirrigeliyaan booqdayaasha inay la imaadaan cunadooda, dhalooyinka biyaha iyo agabyada nadaafadda (oo ay ku jiraan gacmo nadiifiye), iyo sidoo kale inay qaadaan qashinkooda markay baxayaan.
- Ku dhiirrigaliyaan dadweynaha inay la madadaalaystaan xubnaha qoyskooda halkii ay la madadaalaysan lahaayeen kuwa ka tirsan goobahooda bulsheed ee ballaadhan.
- Ku dhiirrigaliyaan dadweynaha inay si baadqab leh u madadaalaystaan kana fogaadaan u safridda ama ku madadaalaysiga meelaha ay adag tahay inay ugu yaraan lix (6) fuud ka fogaadaan dadka kale ee aan ka tirsanayn kooxdooda.
- Qoondeeyaan shaqaale kormeero shuruudaha kala fogaanshaha jireed, xaqiijiyo in kooxaha aysan ka badnayn 10 qof, oona siiya waxbarasho iyo dhiirgalin booqdayaasha si loo taageero u hogaansanaanta.
- Ka hagaajiyaan goobo gacmaha lagu maydho ama dhigaan gacmo-nadiifiye (60-95% ka kooban aalkolo) goobaha caanka ah sida goobaha lagu cunteeyo, hoyga maalintii, iyo dhismayaasha u furan dadweynaha.
- Tixgeliyaan inay dhigaan caag la iska dhex arki karo ama muraayada horta lacag-hayeyaasha ama miisaska xarunta booqdeyaasha, ama meelaha kale ee aadka ay u adag tahay in masaafu ah lix (6) fuud loo dhaxeeysiiyo shaqaalaha, tabarucayaasha iyo booqdeyaashu.

Hagida Xeryaha/Kaamamka dibadda ee habeenkii:

Xeryaha qoysaska ee habeenkii waxay adeegyo siin karaan qoysaska ama dadka waaweyn ee ku wada nool hal qoys.

- Qolalka hudheelka ama hoyga xerada ee gaarka ah waa inay ku koobnaadaan qoys keliya.

Xeryaha dhallinyarada ee habeenkii waxay adeegyo siin karaan dhallinyarada haddii qolalka hudheelka ama hoyga xerada ee gaarka ah la bixiyo.

Xeryaha habeenkii waxaa looga baahan yahay inay:

- Raacaan [Hagida Guud ee Loo-shaqeeyaha ee Oregon](#) ee ku saabsan nadaafadda iyo ku dhaqanka nadaafadda.
- Raacaan [Hagida Xerooyinka Maalinta Xagaaga ee Da'da Dugsiga](#) ee loogu talagalay:
 - Borotokoollada baarista caafimaad iyo qorshooyinka maareynta cudurada la kala qaado.

- Dhaqanada kooxeed ee ku saabsan hawlaha goobta ee xerada maalintii ee loogu talagalay carruurta la socda waalidkood ama mas'uuliintooda sharciga ah.
- Hawlaha qoyseed, oo ay ka mid yihiin shuruudaha kala fogaanshaha kooxeed iyo kuwa jireed marka laga qaybgalayo hawlaha kaamka.
- Qoysasku waxay si iskood ah u sameysan karaan koox xasiloon ama koox keli ah oo aan ka badnayn 10 qof markay ka qaybqaadanayaan hawlaha iyo cuntada. Kooxyada ama kooxaha goonida ahi waa inay joogteeyaan masaafo lix (6) fuud ah oo jir ahaan u dhexeeysa midba midka kale.
- Raacaan [hagida Isu-imaadka ee Gobolka oo dhaniyo Hagida Marxalada 2-aad ee Hawlwadeenada Goobta iyo Munaasabada](#), haddii ay khuseeyaan.
- Raacaan [hagida Barkadaha Dabaasha](#) ee loogu talagalay degmooyinka leh barkado ku-yaalo goobta.
- Raacaan hagida Maqaayada iyo Baararka ee loogu talagalay [Marxalada1-aad](#) ama [Marxalada2-aad](#), haddii ay cunto bixiyaan. Hagida la raacayo waxay ku saleysan tahay gobolka ay kaamamka habeenkii ka dhacayaan.
 - Kooxaha xasiloon ama kooxaha goonida ah ee aan ka badnayn 10 qof ayaa wax u cuni kara “qaab qoyseed” markay dhex joogaan gudaha kooxdooda. Kooxaha badan looma oggola inay wada cunteeyaan.

Ilo Dheeraad ah:

- [Calaamado aad dhejin karto](#)
- [Hagida Maaskaraha iyo Daboolada Wajiga ee Ganacsiga, Gaadiidka, iyo Dadweynaha](#)
- [Hagista Guud ee OHA ee Loo-shaqeeyayaasha](#)
- [Hagida CDC ee Maamulayaasha Jardiinooyinka iyo Xarumaha Madadaalada](#)

Helitaanka: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku siin kartaa dukumiintiyo qaabab kale ah sida luqadaha kale, daabacaad ballaadhan, farta indhoolayaasha ama qaab aad adigu doorbidayso.. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us.